# Fred Hutch Cancer Center

# Xuquuqyadaada iyo Ka dhowrista Kharashaadyada Dawaynta ee Lama filaanka ah iyo Kharashaadyada Dheeriga ah gudaha gobolka Washington

**Waxay dhaqan gali Janaayo 1, 2025**

*Markaad heshid daryeel xaalad degdeg ah ama uu ku daweeyo bixiye ka baxsan shabakada isbitaal ku jira shabakad ama xaruun qaliin oo bixiso adeegyo degdeg ah, waxa la dabolayaa kharashaadyada lama filaanka ah iyo kuwa dheeriga ah.*

## Waa maxay "kharashyada dheeriga ah" (mararka qaarkood loo yaqaano "kharashyada lama filaanka ah")?

Markaad la kulanto dhakhtar ama bixiye daryeel caafimaad kale, waxaa laga yaabaa in lagugu yeesho kharashka laga bixinayo jeebka, sida lacag-bixin, lacag la'aan, iyo/ama laga jari karo. Kharashyadan waxa loo yaqaan kharash-wadaagis. Waxaa laga yaabaa inaad leedahay kharashyo kale ama aad bixiso dhammaan kharashaadyada haddii aad aragto bixiye ama aad booqato xarun daryeel caafimaad oo aan ku jirin shabakadda qorshahaaga caafimaad.

"Shabakadda ka baxsan" waxay qeexaysaa adeeg-bixiyaasha iyo xaruumaha aan qandaraas la saxiixin qorshahaaga caafimaad. Adeeg-bixiyaasha shabakadda ka baxsan ayaa loo ogolaan karaa inay kugu soo dallacaan faraqa u dhexeeya waxa qorshahaagu kugula heshiiyey inuu bixiyo, iyo cadadka buuxa ee lagu dalaco adeega. Tani waxa loo yaqaanaa "kharashaadyada dheeriga ah." Lacagtani waxay inta badan ka badantahay kharashyada shabakadda ee isla adeegga waxaana laga yaabaa inaan lagu tirin xadkaaga sannadlaha ah ee kharashaadyaada aad ka bixiso jeebkaaga.

"Kharashaadyada lama filaanka ah" waa kharashyada dheeriga ah ee aan la filanaynin tani waxay dhici kartaa marka aadan xakameyn karin cidda ku lug leh daryeelkaaga—sida marka aad raacdo ambalaas, wajahdo xaalad degdeg ah ama marka aad ballan ka qabsato rug caafimaad oo ka tirsan shabakadda laakiin si lama filaan ah ay adeeg dawayn kugu siyaan bixiye ka tirsan shabakad ka baxsan xaruunta.

Caymis bixiyaasha waxaa looga baahan yahay inay kuu sheegaan, iyagoo adeegsanay websaydkooda ama haddii aad weydiiso, adeeg-bixiyaasha, isbitaallada, iyo xaruumaha ku jira shabakadahooda. Cisbitaallada, xarumaha qalliinka, adeeg-bixiyaasha, adeeg-bixiyaasha adeegyada caafimaadka degdega ah iyo adeeg-bixiyaasha ambalaasta dhulka waa inay kuu sheegaan shabakadaha bixiyayaasha ee ay ka qaybqaataan shabakadooda ama haddii aad waydiiso.

## Waxaa lagaa dabooli kharashaadyada dheeriga ah ee:

### Adeegyada Degdegga ah

Haddii aad qabtid xaalad caafimaad oo degdeg ah, caafimaadka dhimirka ama xaalad isticmaalka muqaadaraadka oo aad ka hesho adeegyada degdega ah bixiye ama xarun ka baxsan shabakada, bixiyaha ama xarunta inta badan waxa laga yaabaa inay kugu dalacaan waa qadarka kharashka wadaaga ee isku-xidhka qorshahaaga (sida wax-ka-bixinta lacag-bixinta iyo ceymiska). Laguguma soo dallici karo kharashaadyada dheeriga ah ee adeegyadan degdegga ah. Tan waxaa ka mid ah raacidda ambalaasta dhulka ama hawada, iyo daryeelka aad ka hesho isbitaal ama tas-hiilaadka bixiya adeegyada qalalaasaha dadka ay la kulmaan xaalad degdeg ah oo caafimaad dhimir ama isticmaalka muqaadaraadka. Laguguma soo dallici karo kharashaadyada dheeriga ah ee adeegyadan degdegga ah, oo ay ku jiraan adeegyada aad heli karto ka dib marka aad gasho xaalad soo kabsasho.

### Adeegyada qaarkood ee cisbitaalka shabakadaha ama xarunta qalliinka ambalaaska

Markaad adeegyo ka hesho cisbitaalka shabakadaha ama xarunta qalliinka ambalaaska, adeeg-bixiyaasha qaarkood waxaa laga yaabaa inay ka maqan yihiin shabakadu. Xaaladahan, inta badan bixiyayaashan ayaa laga yaabaa inay ku dallilaan waa qadarka kharashka wadaaga ee shabakada qorshahaaga.

**Sidoo kale lagaagama baahna inaad hesho daryeel ka baxsan shabakada. Waxaad dooran kartaa bixiye ama xarun ee ku jira shabakada qorshahaaga.**

## Goorma ayaa lagu weydiin karaa inaad ka dhaafto ilaalintaada kharashyada dheeraadka ah:

Adeeg-bixiyaasha daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan isbitaallada, adeeg-bixiyaasha adeegyada caafimaadka dabeecadda degdega ah, iyo adeeg-bixiyaasha gaadiidka xaaladaha degdega ah ee kuwa dhulka ama hawada ah, **marnaba** kagama baahnaan donaan inaad ka tanaasusho in laga daboolo bixinta kharashaadyada dheeriga ah.

Haddii aad caymis ku leedahay qorshe caafimaad oo koox iskood isu maalgeliso, xaaladaha qaarkood, bixiyaha ayaa ku weydiin kara inaad ogolaato inaad ka tanaasusho xeerarka bixinta kharashyada dheeraadka ah, balse **marnaba** lagagama baahna inaad bixiso ogolaanshahaaga. Fadlan la xiriir cidda aad u shaqayso ama qorshaha caafimaadka wixii macluumaad dheeraad ah.

## Marka bixinta kharashaadyada dheeriga ah aan la ogolayn, waxa kale oo aad haysataa waxyaabaha ilaalinta soo socota:

- Waxaad ka mas'uultahay oo kaliya bixinta qaybtaada kharashka (sida qayb-bixinta, caymiska, iyo lacagaha laga jarayo ee aad bixin lahayd haddii bixiyaha ama xaruntu ay ku jirto shabakad). Qorshahaaga caafimaad wuxuu si toos ah u bixin doonaa adeeg-bixiyaasha iyo tas-hiilaadka ka baxsan shabakada.
- Guud ahaan qorshahaaga caafimaad waa waajib inuu:
  - Daboolo adeegyada degdegga ah adigoon u baahnayn inaad oggolaansho hore u hesho adeegyada (ogolaanshaha hore).
  - Daboolo adeegyada degdega ah ee adeeg-bixiyaasha ka baxsan shabakadda.
  - Ku salee waxa lagugu leeyahay bixiyaha ama xarunta (kharash-wadaaga) waxa ay bixinayso bixiyaha ama xarunta oo tus cadadkaas sharaxaadaada faa'iidooyinka.
  - Tiri qaddar kasta oo aad ku bixiso adeegyada degdegga ah ama adeegyada shabakadaha ka baxsan xagga xadka jeebka lagaa jarayo iyo ka baxsanba.

**Haddii aad aaminsantahay in si khalad ah laguugu soo dalacay kharashaadyo**, waxaad ashtako ugu gudbin kartaa dawlada federaalka ah

**https://www.cms.gov/nosurprises/consumers** ama adoo wacaya 1-800-985-3059; iyo/ama u gudbi ashtako Xafiiska Gobolka Washington ee Guddoomiyaha Caymiska **websaydkooda** ama adoo wacaya 1-800-562-6900.

Booqo **https://www.cms.gov/nosurprises** wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqoyinkaaga sida uu qabo sharciga federaalka ah.

Booqo **websaydka Washington state Office of the Insurance Commissioner's (Xafiiska gobolka Washington laanta Guddoomiyaha Caymiska)** wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqoyinkaaga sida uu qabo sharciga federaalka ah.